



Saacadaha Ugu Adeegidda Guriga iyo Ka Reebanaanta ee shakhsiyaadka iyo qoysaska

Ku qorshaynta inta lagu jiro saacadaha adeegga

Dadka intooda badan waxay dabooli karaan baahiyahaaga muddada saacadaha kooxdooda adeegga shaqaynayaan. Isku-duwaha adeegyadaada ama wakiilkaaga gaarka ah ayaa kaa caawin doona inaad qorshayso sida loo daboolo baahiyahaaga looguna noolaado nololsha aad rabto adigoo isku fillaysiinaya saacadaha ay kooxda adeeggu kuu adeegto.



Waxa ku jira khayraad badan websaytkeena **Saacadaha Ugu Adeegga Guriga**. Sidoo kale waxaad ku iskaan garayn kartaa koodhka QR aalad casri ah si aad u gali karto websaytka.



www.oregon.gov/odhs/compass/Pages/resources-individuals.aspx

Codsiga Ka Reebanaan

Dadka qaar waxay u baahan karaan saacado ka badan inta ay kooxda adeeggu ugu talogaleen.

Haddii aadan ku dabooli karin baahiyahaaga saacadaha ay kuugu talogaleen kooxda adeeggaagu, waxaad codsan kartaa ka reebitaan.



Isku-duwaha adeegyadaada ama wakiilka gaarka ah ayaa kaa caawin doona inaad codsato ka reebanaan 14 maalmood gudahood codsigaaga.



ODDS waxay kuu soo diri doontaa waraaq sheegaysa go'aankooda 45 maalmood gudahood laga bilaabo markay helaan codsigaaga.



Wax badan ka baro **hannaanka ka reebanaanta** ood ka heli karto websaytkeena:

www.oregon.gov/odhs/idd/pages/exceptions.aspx



Ka Reebanaanta Saacadaha Ugu

Adeegidda Guriga


Waxaad u sheegi kartaa isku-duwaha adeegyadaada ama wakiilka gaarka ah inuu kuu codsado ka reebanaan haddii aysan kugu fillayn saacadaha kooxda adeeggaagu kuu qoondeeyeen si aad u daboosho mid ka mid ah baahiyahan.



Baahiyaha aan joogtada ahayn


Waxa jira waxyaalo aad caawimo badan ugu baahan tahay arrintaas:

- maalinta oo dhan ayey dhacdaa
- lama muddayn karo (ma garanaysid markaad u baahan doonto taageero)
- oo haddii aan baahidan la daboolin, waxa dhici karta in dhaawac ku soo gaaro ama xanuusato




Baahiyuhu waxay qaataan wakhti ka badan inta caadiga ah

- Waxaad leedahay baahi qaadata wakhti ka badan in wax laga qabto inta ay qaataan dadka kale ee baahiyahan oo kale qabaa
- Baahiyahaaga oo dhan ma noqon karaan qaar la daboolo



Karantiil Bulsheed

- Waxaad u baahan tahay caawimo si aad bulshada u dhexgasho
- Ma awoodid inaad magaalka u baxdo ugu yaraan 20 saacadood toddobaadkii si aad hawlo iyo shaqooyin kale u soo qabsato



Su'aalo ma qabtaa?

Waxaad iimeyl noogu soo diri kartaa:
odds.questions@odhsoha.oregon.gov



Waxaad ka heli kartaa shuruudaha faahfaahsan ee ka reebanaan kasta webbeejka Saacadaha Ugu Adeegidda Guriga:

www.oregon.gov/odhs/compass/Pages/resources-individuals.aspx#exceptions

Waxaad ku heli kartaa bilaash dukumintigaan isagoo ku qoran luuqado kale, far waawayn, qoraalka dadka aragga la', ama qaabka aad jeceshahay u qoran. Kala Xiriir Xafiiska Adeegyada Naafooyinka Korriinka (ODDS) ee Oregon iimeylka dd.directoroffice@odhsoha.oregon.gov ama lambarka 503-945-5811. Waynu aqbalnaa nooc kasta oo adeegga gudbinta ah.